

Sidewalk Improvement District Program

Barnaamijka Degmada Hagaajinta

Waddo-lugeedka

Waa maxay barnaamijka Degmada Horumarinta Waddo-lugeedka (SID)?

Barnaamijka SID waxa uu dib u habayn ku sameeyaa kharashka dayactirka iyo beddelaada waddo-lugeedka mulkiilaha guriga ku xiga si loogu qaybiyo qayb badan oo ka mid ah bulshada, maadaama waddo-lugeedku faa'iido u leeyahay, oo diyaar u yahay isticmaalka, dadka oo dhan.

Waa maxay faa'iidooyinka?

Faa'iidooyinka SID waxaa ka mid ah:

1. Barnaamij la fahmi karo, la saadaalin karo, ku habboon oo la awoodi karo ee milkiilayaasha hantida.
2. Qiimaha socodka bulshada ku habboon oo loo qaybiyaa dhammaan dadka deggaanka.
3. Barnaamij si hufnaan badan lagu maamulo.

Maxay tani uga dhigan tahay hantiilayaasha?

1. Mas'uuliyadda dayactirka waddo-lugeedka waxay ka wareegaysaa milkiilaha guriga ku xiga oo ay u wareegayso barnaamijka sanadlaha ah ee Magaalada.
2. Kharashka dayactirka waddo-lugeedka waxa uu ka wareegayaa mulkiilaha guriga ku xiga una wareegaya Hagaajinta Waddo-lugeedka Degmooyinka.
3. Milkiilayaasha guryaha ayaa bixin doona qiimaynta Hagaajinta Wado-lugeedka Degmada sanadkiiba mar; ma jiri doonto khidmad lama filaan ah ee waddo-lugeedka.
 - A. Sannadka 2020, marka loo eego barnaamijkii hore ee hagaajinta waddo-lugeedka, milkiilayaasha guryuhu waxay bixiyeen celcelis ahaan \$854 dayactirka waddo-lugeedka. Waxay ahayd wax caadi ah in guryaha ay bixiyaan khidmadaha u dhexeeya \$3,000-\$5,000.
 - B. Celceliska heerka deegaanka ee la filayo barnaamijka cusub waa \$57 sanadkii.
 - C. Guryaha aan lahayn tas-hiilaadka dadka lugeynaya ee ku tacaluqa hantidooda waxay bixiyaan qiime dhimis 50% ah iyadoo lagu saleynayo Xeerkooda Istimmaalka Dhulka.

Sidee u shaqeyaa barnaamiju?

Barnaamijka Horumarinta Waddo-lugeedka Degmada wuxuu isticmaalayaa khariidada Rochester oo u qaybsan 21 aag mashruuc oo gaar ah. Goobahan mashruucyada gaarka ah waxa laysku raaciyeey lix degmo oo waaweyn. Qiimaha goobta mashruuca waxaa wadaaga milkiilayaasha guryaha ee degmada weyn muddo shan sano ah. Wareegtada barnaamijka ayaa degmo kasta u keenta mashruuc shantii sanaba mar, waxaana labaatankii sanaba mar la baaro waddo-lugeed kasta oo magaalada dhexdeeda ah. (Istimmaalka mugga xad-dhaafka ah awgeed, waxaa bartamaha degmada (downtown) ka jiri doona mashruuc waddo-lugeed ah 5-tii sanaba mar. Mashruucyada Bartamaha Degmada (Downtown) waxay dhacaan isku mar marka loo wareego degmada NE.) Qiimaynta SID waxa lagu bixiyaa cashuurta guryaha sannadkii.

Waa maxay jadwalka waqtiga barnaamijka?

- Dayrt: Kormeerayaasha Hawlaha Guud waxay tilmaamaan oo calaamadiyaan cilladaha waddo-lugeedka mashruuca soo socda
- Bartamaha Jilaalka: Golaha Magaaladu waxa uu oggolaadaa khariidad aag mashruuc oo la cusboonaysiifyay, miisaaniyada mashruuca iyo heerka qiimaynta 5-sano. Milkiilyaasha guryaha ee mashruuca soo socda Degmadu waxay helaysaa ogaysiis qiimaynta SID shanta sano ee soo socota.
- Guga: Dhismaha

Faahfaahin Dheereaad: www.rochestermn.gov/sidewalks or 507-328-2466

Horumarinta Waddo-lugeedk Degmada – Qabyo-qoraalka la soo jeediyay

